DEPARTMENT OF HEALTH

# Xeerka Xuquuqda Daryeelka Guriga Minnesota

## MACAAMIISHA BIXIYEYAASHA DARYEELKA GURIGA EE SHATIGA LEH OO KELIYA

## Bayaan xuquuqda

Macmiil qaata adeegyada daryeelka guriga ee bulshada wuxuu leeyahay xuquuqdan:

1. Hel macluumaad qoraal ah, oo luqad fudud ah, oo ku saabsan xuquuqda ka hor helitaanka adeegyada, oo ay ku jirto waxa la sameeyo haddii xuquuqda la jebiyo.
2. Hesho daryeel iyo adeegyo waafaqsan qorshe ku habboon oo casri ah, oo ay ku xiran tahay daryeelka caafimaadka la aqbalay, heerarka caafimaadka ama kalkaalinta iyo daryeelka qofka ku saleysan, si aad uga qeyb qaadato horumarinta, wax ka beddelka, iyo qiimeynta qorshaha iyo adeegyada.
3. Lagu wargeliyo ka hor helitaanka adeegyada nooca iyo xirfadaha shaqaalaha bixiya adeegyada, inta jeer ee booqashooyinka la qorsheeyay, doorashooyinka kale ee la heli karo si loo daboolo baahiyaha daryeelka guriga, iyo cawaaqibka ka dhalan kara diidmada adeegyadaas.
4. Lagu wargeliyo hore wixii isbeddel ah ee uu bixiyaha ku taliyo qorshaha adeegga, isla markaana si firfircoon uga qayb qaato go'aannada ku saabsan isbeddellada qorshaha adeegga.
5. Diido adeegyo ama daaweyn.
6. Ogaado, ka hor helitaanka adeegyada ama inta lagu jiro booqashada hore, xaddidaadaha adeegyada laga heli karo bixiyaha daryeelka guriga.
7. Lagu wargeliyo ka hor inta aan adeegyada la bilaabin waxa bixiyaha ku dallaco adeegyada; inta ay suurtagal tahay in lacag bixinta laga filan karo caymis caafimaad, barnaamijyo dadweyne, ama ilo kale haddii la yaqaan; iyo kharashyada uu macmiilku masuul ka noqon karo bixintooda.
8. Ogaado in adeegyo kale laga heli karo bulshada, oo ay ku jiraan adeegyo kale oo daryeel guriga ah iyo bixiyeyaal, iyo inuu ogaado halka laga heli karo macluumaad ku saabsan adeegyadaas.
9. Si xor ah uga dooro bixiyeyaasha la heli karo oo beddelo bixiyaha ka dib marka adeegyada la bilaabo, iyadoo ku xaddidan caymiska caafimaadka, caymiska daryeelka muddada-dheer, kaalmo caafimaad, barnaamijyo caafimaad kale ama barnaamijyo dadweyne.
10. In macluumaadka shakhsiyeed, dhaqaale, iyo caafimaad la ilaaliyo, isla markaana lagu wargeliyo xeerarka iyo habraacyada bixiyaha ee ku saabsan shaacinta macluumaadkaas.
11. Ka hel diiwaanka macmiilka u gaar ah iyo macluumaadka qoran ee diiwaannadaas si waafaqsan Xeerka Diiwaanka Caafimaadka Minnesota, Xeerarka Minnesota, Qaybaha 144.291 ilaa 144.298.
12. In lagu adeego dad si habboon loo tababaray oo karti u leh inay gutaan waajibaadkooda.
13. In loola dhaqmo si xushmad iyo ixtiraam leh, isla markaana hantida macmiilka loola dhaqmo si ixtiraam leh.
14. In laga xor ahaado xadgudub jireed iyo afka, dayac, ka faa'iidaysi dhaqaale, iyo dhammaan noocyada xadgudubka ee lagu daboolay Xeerka Dadka Waayeelka ah ee Nugul iyo Xeerka Xadgudubka Carruurta.

15. Ogeysiis macquul ah oo hore oo ku saabsan isbeddellada adeegyada ama kharashyada.
16. Ogaado sababta bixiyaha uu u joojiyay adeegyada.
17. Ugu yaraan toban maalmood oo jadwal ah ogeysiis hore oo ku saabsan joojinta adeeg bixiye daryeel guriga, marka laga reebo ugu yaraan 30 maalmood oo jadwal ah ogeysiis hore oo bixiyaha daryeelka guriga uu bixiyo adeegyada la siiyo macmiil ku nool xarun nolol caawineed sida lagu qeexay qaybta 144G.08, qaybta 7. Qodobkan kama khuseeyo xaaladaha ay ka mid yihiin:
    a. Macmiilku ku dhaqmo si si weyn u beddela shuruudaha qorshaha adeegga ee bixiyaha daryeelka guriga;
    b. Macmiilka, qofka la nool macmiilka, ama kuwa kale abuuraan deegaan shaqo oo xadgudub ah ama aan ammaan ahayn qofka bixiya adeegyada daryeelka guriga; ama
    c. Degdeg ama isbeddel weyn oo ku yimid xaaladda macmiilka ayaa sababay baahiyo adeeg oo ka badan qorshaha adeegga ee hadda jira oo aan si ammaan ah loogu dabooli karin bixiyaha daryeelka guriga
18. Wareejin isku dubaridan marka uu jiri doono isbeddel bixiyaha adeegyada.
19. Cabasho loo gudbiyo shaqaalaha iyo kuwa kale ee macmiilku doorto ku saabsan adeegyada la bixiyo, ama aan la bixin, iyo maqnaanshaha xushmad ama ixtiraam loo muujiyo macmiilka ama hantidiisa, iyo xuquuqda lagu talin karo isbeddelka xeerarka iyo adeegyada, iyadoo aan laga aargudan, oo ay ku jirto hanjabaadda joojinta adeegyada.
20. Ogaado sida loola xiriiro qof la xiriira bixiyaha daryeelka guriga oo mas'uul ka ah maaraynta dhibaatooyinka iyo in bixiyaha daryeelka guriga uu baaro oo isku dayo inuu xalliyo cabashada ama dacwadda.
21. Ogow magaca iyo ciwaanka gobolka ama wakaalada degmada si aad ula xidhiidho macluumaad dheeraad ah ama caawimo.
22. Ku adkee xuquuqdan si shakhsi ah, ama waxaa ku adkayn kara wakiilka macmiilka ama qof kasta oo ku hadla magaca macmiilka, iyadoo aan laga aargudan.
23. Ku rakib qalab kormeer elektaroonik ah booska macmiilka ama qofka degan waafaqsan shuruudaha gobolka.

Waxaad dooran kartaa inaad ka wada hadasho walaacyadaada bixiyahaaga. Xusuusin ahaan, bixiyeyaasha waxaa looga baahan yahay inay shaqeeyaan si loo hubiyo in xuquuqdaada iyo shuruudaha kale la raaco. Marka bixiyeyaashu jebiyaan xuquuqda qaybtaan, waxay ku mutaysanayaan ganaaxyo iyo tallaabo shatiga ah sida ku cad qaybaha 144A.474 qaybta 11 iyo 144A.475.

Bixiyeyaasha waa inay sameeyaan dhammaan waxyaabaha soo socda:

- Ku dhiirrigeli oo ka caawi isticmaalka buuxa ee xuquuqdan.
- Bixi magacyada iyo lambarrada telefoonka ee shakhsiyaadka iyo ururrada bixiya adeegyada u doodista iyo sharci ee macaamiisha iyo Dadka Deggan doonaya inay ku adkeeyaan xuquuqdooda.
- Samee dadaal kasta si aad uga caawiso macaamiisha ama Dadka Deggan helitaanka macluumaad ku saabsan in Medicare, kaalmo caafimaad, barnaamijyo caafimaad kale, ama barnaamijyo dadweyne ay bixin doonaan adeegyada.

- U samee hooy macquul ah dadka qaba naafonimada isgaarsiinta, ama kuwa ku hadla luqad aan Ingiriisi ahayn.
- Bixi dhammaan macluumaadka iyo ogeysiisyada luqad fudud iyo ereyo uu macmiilka ama qofka degan fahmi karo.

Bixiye ma dalban karo ama ma codsan karo macmiil ama qofka degan inuu ka tanaasulo xuquuq kasta oo ku taxan qaybtaan wakhti kasta ama sabab kasta, oo ay ku jirto shuruudda bilaabidda adeegyada ama gelitaanka heshiiska nolol caawineed.

## Fasiraadda iyo Dhaqan-gelinta Xuquuqda

Xuquuqdan waxaa loo dejiyay faa'iidada macaamiisha qaata adeegyada daryeelka guriga. Dhammaan bixiyeyaasha daryeelka guriga, oo ay ku jiraan kuwa laga dhaafay qaybta 144A.471, waa inay u hoggaansamaan xuquuqdan. Guddoomiyaha ayaa u fulin doona qaybtan iyo sharciga daryeelka guriga ee xuquuqda looga baahan yahay bixiyayaasha daryeelka guriga ee laga dhaafo shatiga si la mid ah kuwa shatiga haysta.Bixiye daryeel guriga ah ma dalban karo ama ma codsan karo macmiil inuu ka tanaasulo mid ka mid ah xuquuqdan si shuruud loogu helo adeegyo. Bayaankan xuquuqduma beddelayo  ama ma dhimaayo xuquuqda iyo xorriyadaha kale ee laga yaabo inay jiraan ee la xiriira macaamiisha qaata adeegyada daryeelka guriga, dadka bixiya adeegyada daryeelka guriga, ama bixiyeyaasha daryeelka guriga ee shatiga leh ee hoos yimaada qaybaha 144A.43 ilaa 144A.482.

## Kheyraadka

Waxaad la xiriiri kartaa bixiyahaaga shatiga leh sida hoos lagu xusay ________________________________________

Magaca Bixiyaha Shatiga leh:______________________________________________________________

Telefoon:______________________________________________________________________

Iimayl:________________________________________________________________________

Ciwaanka guriga:________________________________________________________________

Magaca iyo xilka qofka loo gudbin karo dhibaatooyinka ama cabashooyinka:_______________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

# Adeegyada ilaalinta iyo u doodista

Soo sheeg xadgudub, dayac, ama ka faa'iidaysi dhaqaale oo laga shakiyo oo ku saabsan qof waayeel ah oo nugul:

**Xarunta War-gudbinta Xadgudubka Dadka Waawayn Minnesota (MAARC)**
1844-880-1574
Minnesota's Adult Protective Services (https://mn.gov/dhs/people-we-serve/seniors/services/adult-protection/maarc.jsp)

**Dhammaan cabashooyinka kale ee** aan ahayn xadgudub, dayac ama ka faa'iidaysi dhaqaale oo laga shakiyo oo ku saabsan qof waayeel ah oo nugul, fadlan la xiriir Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka Minnesota:

**Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka**
(651) 201-4200/1-800-369-7994
health.ohfc-complaints@state.mn.us
Ciwaanka boostada:
Waaxda Caafimaadka Minnesota
Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka
P.O. Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970

Waaxda Caafimaadka Minnesota
Qaybta Xeerarka Caafimaadka
PO Box 64900
St. Paul, MN 55164-0900
651-201-4200
health.fpc-licensing@state.mn.us
www.health.state.mn.us

2/20/2026

*To obtain this information in a different format, call: 651-201-4200.*